

Haddii aadan deganaansho ku haysanin UK

Dalbo deganaansho

Haddii uu burburey xiriirkaagii aad la laheyd qof muwaadin British ah amaba qof deggan UK xadgudubka qoyska awgiis waxaa suurtagalah in aad dalban karto [deganaanshaha loogu talagaley ku dhibanaha rabshadaha guriga \(settlement as a victim of domestic violence\)](#).

Ayadoo taa la tixgelinayo, dawladdu waxay bixisaa Rukhsadda ku Dhibanaha Rabshadaha Qoyska (Destitute Domestic Violence concession), oo caawimaad siiya dhibanayaasha xadgudubka guriga oo la leh xiriir ay dhaqaale ahaan ku tiirsan yihiin lammaane ku xadgudbaya, kuwaas oo loo ogolaaday in ay UK ku soo galaan isqabitaan, lammaanayaal aad is qabin, lammaane isku jinsi ah ama lammaane si madani ah isula nool oo haysta dhalashada Ingiriiska ama qof deggan UK.

Dalbo in aad hesho kaalmooyinka dowladda [Destitution Domestic Violence concession](#) waxaa ay u yaboohdaa ku dhibanaha xadgudubka qoyska ogolaansho 3 bilood ah oo ka baxsan sharcivada socdaalka iyagoo xaq u yeelanaya in ay dalbadaan in ay helaan kaalmooyinka khasnadda dowladda. Tani waxay fursad u siineysaa helitaanka sharci waddanka aad ku joogo oo ku meelgaar ah oo ka madax bannaan xadgudubka iyo meelgelinta hoy ammaan ah, halkaas oo dhibanayaasha xadgudubka qoyska ay tixgelin karaan codsashada ogolaansho deganaansho joogta ah ama ay go'aansanayaan inay ku noqdaan waddankoodii hooyo.

Foomamka kore waa in lagu buuxiyaa af Ingiriis. Haddii aad u baahan tahay taageero in aad buuxiso waxaad caawimaad ka raadsan kartaa hay'adaha kheyriga ah ee xadgudubka guriga sida [Refuge](#).